Erey bixin

Sharrax ereyada

1.dhalanteed:waa muuqaalka biyaha u eg ee xilliyada kuleylaha ka muuqda dhulka banaanka ah.

2.dharab:waa xilliyada roobku da,aan ee dhulku rays badan leeyahay,isla kolkaana yabaqa meel fog laga maqlo

3.dhedo:waa dhibicda roobka ee soo da,da oo baraf fadhiya ah

4.dheel:waa qoyaanka sayaxa oo kale ah ee ay dhaxanta qabow ama dabaysha suyuca ah ku sameyso dhulka korkiisa habeenkii sida gibilka guriga iyo dhirta dushooda.

5.dhool:waa daruur go,an oo dhanka bari ka soo baxda

6.duufaan:waa roobka iyo dabaysha xoogga badan ee badaha ka soo kaca oo mood iyo nool waxa ay helaan xaaqa oo baabaah ka dhig

7.fad:waa madaxa daruurta ah ee ka soo murbaxa daruurta kale kolka ay daruuro badan oo gudban oo is haysta ay meel ka muuqdaan

8.gabaxle:waa roobka aan xoogga u hoorin ee muddo dheer sii da,a kadib kolka roob xooggan da,ay

9.gargoor:waa biyaha ka lusha caleenta dhirta xilliga barwaaqada ah

10.gudgude:waa roobka da,a habeenka guga ugu danbeeya oo dhul balaaran isku mara

11.cirrid:waa cadka gaduudan ama madow ee ilkuhu ku fadhiyaan

12.cirincir:meel fog ku libidhsan,meel aan ishu gaareyn

13.cirkaa looga dhawaaqay:talo xun ayaa la siiyay dhibaataa haysata

14.cirrimis:waa dabaysha dhulka is maleegta ee cirka isku liqdaarta kolka roobku curanayaan ay kaliilaha tahay

15.ciyi:waa hilibka reerka wax qashay siiyo reeraha kale

16.cobol:rucubta sare ee baarka geedka duurka

17.coobbe:waa qanjirada ku yaala xagga sare ee meesha labada hunguri ku kulmaan ee dhawaaqa iyo jabaqda abuura

18.codkiisuu ka dheereeyay:arintu wuu ku degdegay wax kale ayuu isu qaatay

19.conqol:waa kolka laagta ama dhudhubta yeelato meelo laab laab ah oo yara leexsan

20.cod curiye:waa xidid mergi ah oo hunguriga labada dhinac ka mara

Ereyga	lidkiisa	E.kale oo la micno ah
1.gibil	gogol	maqaar
2.Gun	baar	jiridda geedka
3.Dululaati	ciq	dalool yar oo banaan
4.Daryeel	baylah	xanaanayn
5.Juuq	jaaq	hadal yar oo kooban
6.Caad	sir	wax muuqda/wax cad
7.Murti	maleeg	xigmad
8.Axan	agas	xoolo la qasho oo lagu duceysto
9.Agabar	layli	jar bar/jababar
10.Shalay	maanta	maanta maalintii ka horeysay

Maahmaah

1.is xasuustaa is xabaalan

2.gacalkaa gacalkiisa kuuma jabiyo

3.jid ma qaloocna ee jidiin baa qaloocan

4.jir jimicsadaa caafimaad ku jiraa
5.jinni ninkii keenaa baxsha
6.jir bukaa jeelkii leh
7.jir qalaad waa dhul qalaad
8.jirkii la haye jiriid kama qoslo
9.ka dar oo dibi dhal

Suaalo iyo jawaabo

1.maxey tahay dulucda sheekada mudnaan badan?

- Dulucda sheekada waxey tahay in haweynka soomaaliyeed ay yihiin horumarka ragga sababtoo ah haweenku waa macalinka ugu horeeya ee dadka waxbara sida:afka iyo dhaqanka toosan.waxa ay doorweyn ku leeyihiin halganka ay ummadi ugu jirto hanashada rabitaankeeda toosan,waxaase taa ka sii weyn bal aan eegno hooyada iyo marxalada ay marto si ay adiga kuu soo saarto,waxa aad arkeysaa sheekh,aqoonyahan,macalin,wasiir,madaxweyne,ciyaaryahan,abwaan,genaraal,safiir,ganacsade iwm.dadkaasi qiimaha badan waxa soo wada barbaariyay waa dumar.

2.maxaad ka faa'iideysatay sheekada adiga qof ahaan?

- Sheekada waxaan ka faaiiday in inta badan ragga haweenka ay liidaan laakiin haween la,aantii waxba ma hagaagi karaan waayo maalinta inanta warka barato ayeey bilowdaa gargaarkeeda,hana qaadkeeda labaad nadaafada reerka ayeey kala qeyb qaadataa sidoo kale waxaa la yiraahdaa kaalin wacan ayey kaga jirtaa waxbarshada oo la ogaaday waxbarashada haweenka iney ka waxtar badan tahay tan ragga waa tii horey loo yiri (haween wax baratay waa qoys wax bartay

3.jilahee ayaad is leedahay qeybta ugu weyn ayuu ku lahaa sheekada ?sababee?

- Jilaha qeybta ugu weyn ku lahaa sheekada waxa uu ahaa odey guure sabab too ah waxa uu keenay taladii ahayd in wiilka socdaal loo guuriyo gabar socdaal waxa uu helay gabar fiican oo noloshiisa wax ka badasha

4.meeqa jile ayaa sheekada ka muuqda,maxeyse kala yihiin kaalimahooda?

- Jilidda 1aad waxa uu ahaa wiil lagu magacaabo socdaal kaalintiisu waxey ahayd inuu jilo wiil aan fiicnayn
- Jilidda 2aad waxay ahayd inanta lagu magacaabo dhool oo ahayd inantii badeshay mustaqbalka socdaal oo marwadiisa noqotay
- Jilidda 3aad waxa uu ahaa odey guure oo ahaa odeygii ku taliyay in socdaal loo guuriyo gabar wanaagsan
- Jilidda 4aad waxa uu ahaa ader guurow oo ahaa aderkii tusaalaha ka bixiyay dhanka diinta oo ku saabsanayd haweenka

5.yaa curiyay guurowga hooyadu waa lama huraan?muxuuse ka hadlayaa guurowga?

- Waxaa tiriyay abwaan carays ciise kaarshe(AUN)
- Wuxuu ka hadlayaa qiimaha hooyada

Diyaarin:FARDOWSA MACALIN CABDI(ARAGSAN)